



## **Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WAR SAXAAFADEED 012/2009**

## **FALKAN BURCAD BADEEDNIMO WAA DAANDAANSI HOR LEH OO CUSUB**

Nayroobi, 09 Abril 2009 - Ergayga Gaarka ah ee Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya, Ahmedou Ould-Abdallah ayaa canbaareeyey burcad-badeednimaddi dhoweyd ee ka dhacday dhulka xeebaha Soomaaliya ka baxsan.

“Mar labaad, falal burcad badeednimo ay ku dheehan tahay ayaa ka imaanaya dhinaca Soomaaliya ” ayuu yiri Ahmedou Ould Abdallah. “Usbuucaan oo keliya, lix (6) markab ayaa la afduubay- maalintiiba waa markab- waana dhacdo cusub oo ay sameeyeen burcadd-badeeda Soomaaliya.. Falalkaani, oo mararka qaarkood laga fuliyo meel 9 boqol oo kilomettir ka baxsan xeebaha Soomaaliya waa daandaansi cusub oo loo geesanaayo bulshadda caalamka. Jawaabta waa in ay ahaato mid cad, hadal-ahaanna si sugan loo canbaareyo, ficil- ahaanna talaabo cad laga qaada masiibadaani. Falalkan dambiilenimada ah waa in aan la ogolaanin in uu isku sii socdo waddadii ku dhisneyd waxa afka qalaad loo yaqaano ‘IMPUNITY’ (dembigal oo iska soco adiga oo xor ah oo aysan jirin cid kula xisaabtamaysa).

“Waa in ciidamo la soo dhigaa dhulka xeebaha Soomaaliya ka baxsan, taas oo ah joogitaanka maraakiibta caalamiga ah- oo ka imaanaya qaaradaha kala gedisan- taas oo waaqafsan qawaaniinta caalamiga ah - waana in la soo kordhiyaa lana xoojiyaa maraakiibtan. Gobalka, ciidamo keenista waa laga soo dhoweeyey, waxaanna loo arkay in ay tahay arrin la isku barbar taagaayo dadka iyo wadamada gobalka ka jira”.

“Falalkaani burcad badeednimada ah waxay wax u dhimayaan xurriyada bad-mareyn-nimada, siyaasadda, deganaanshaha dhaqaale ee gobalka, qeybinta kaalmada bani’aadinimo iyo arrimmaha deegaankuba.

Korarka falalka burcad-badeednimo ku dhisan wuxuu ceeb ku yahay sharuudca caalamiga ah, waxaa kale oo arrintaani bulshadda caalamka ka dalbanaysaa inay u fidiso kaalmo ku- haboon iyo taageero cusub xukuumadda Soomaaliyeed si ay si wax ku ool ah uga qabato halka ay burcad-badeednimada ka soo unkamayso. Waa in ay si dhab ah isku xirnaadaadan sugitaanka nabadgelyada, siyaasada iyo horumarintaba.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan la xiriir: Susannah Price / Donna Cusumano,  
Public Information Officers, UN Political Office for Somalia (Nairobi, Kenya)

Tel: +254 20 762 7132 / 7133 or +254 733902020 / 737400133

Fadlan booqo: [www.UN-Somalia.org](http://www.UN-Somalia.org)

Ould-Abdallah wuxuu yiri Waa in xukuumada cusub ee Soomaaliya la kaalmeeyaa si ay wax uga qabato asalka burcad-badeednimada “ waa in gacan laga siiyaa sidii ay u sii deyn lahaayeen lahaystayaasha ay nasiib-daridda haysato-haddii ay Soomaali ama Ajanbi yihiimba- kuwaasoo muddo dheer loo diiday xurriyadoodi iyo eheladoodiiba inay la hadlaan: ayuu yiri Ould-Abdallah.

Qaramadda Midowga, Midowga Afrika oo ay weheliyaan ururka Jaamacada Carabta, ururka Islaamka Aduunka, Midowga Yurub ayaa qabanayaa shir 23 Aprill; si loo taageero Soomaaliya waxna looga qabto arrimaheeda nabadgelyada. Shaki iigama jiro in shirka ay ka soo bixi doonto guul natiijo ku fadhida ayuu yiri Ould-Abdallah.